
ILXAAD AMA ALLADIID
Maxamed Cabdullaahi Goosaar

## Ilxaadka ama Alladiidka

Soomaalida waa bulsho ku caan baxday islaamnimada iyo in aysan rumeysneyn ama ka jirin diin aan Islaamka aheyn, waxa ay aheyd bulsho ku ad adag ku faanidda iyo sheegashada lahaanshaha Islaamka diin ahaan, iyo inay kamid tahay bulshooyika yar ee dunida ka jira laguna tiriyo inay 100% muslim yihiin. Inkastoo ay jiri jireen tira yar oo soomaali ah oo lagu sheego inay gaaloobeen oo diin aan islaamka aheyn qaateen, ama diintii Islaamka ka tageen, haddana ma gaarsiisneyn tira sugan oo 1% lagu tilmaami karay, waxa ayna ahaayeen dadkaasi dhowr qeybood:

Dad ay duruufo nololeed u geysay in ayagoo yaryar ay kusoo barbaaraan gacanta hey'ado kirishtaan ah oo dalka ku lahaa xarumo adeegyo caafimaad iyo waxbarasho lagu hoos qarin jiray faafinta diinta kirishtaanka.

Dad mudda hore dalka ka dhoofay, ama u shaqeynayay gumeystihii sidaasna ku qaatay diinta kirishtaanka.

Dad u badan saraakiishii ciidanka ee xilligii dowladahii milateriga iyo tii rayidka ee ka horreysay tababar loogu diray dalalkii shuuciyadda ee Midowga Soofiyeeti

horkacayay, kuwaas oo soo laabtay ayagoo Alla diid ah ama meel iska dhigay ku dhaqanka diinta, kuwaasi oo inta badan sanado kaddib ku soo laabtay islaamka, waxii ka dhacayna u arkay gabi dhac dhalinyarannimo.

Sidoo kale intii burburkii dalka ka dhacay oo in badan oo Soomaali ah u hayaameen dalal shisheeye waxaa jiray tira yar oo Soomaali ah oo sheeganeysay in ay diinta kirishtaanka qaateen, laakiin ma aheyn tiro misaan leh.

Ilxaadka cusub
Dhanka kale waxaa waayadan dambe baraha bulshada kusoo badanaya dhallinyaro Soomaali ah oo ku doodaya in ay isaga baxeen diinta Islaamka ayagoo waliba diiddan jiritaanka Ilaahay iyo saxnimada diinta Islaamka, kuna qanceen inuusan jirin Ilaah ay rumeysanyihiin. Dhallinyaradan oo ku saamoobay rag Carab iyo caddaan isugu jira, qaar nool iyo qaar mar hore geeriyooday intuba, dhamaantoodna ku caan baxay in ay yihiin MULXIDDIIN ama ALLADIID. Dhallinyaradan waa kuwo ka saameyn badan dhammaan qeybihii aan sare kusoo sheegnay, waa dhallinyaro dal iyo dibadba jooga, waxa ay aqoon heerarkeeda kala duwanyahay u  leeyihiin diinta islaamka iyo afka carabiga, waa koox abaabulan halganna ugu jirta faafinta fikirka Alla diidnimada, waxa ay si baahsan u adeegsadaan baraha bulshada, waxa ay weerar qayaxan ku qaadaan wax walba oo muqaddas u ah Islaamnimada, waxa ay toos u weeraraan (Ilaahay, Nabiga iyo Qur’aanka).
Haddaba waa maxay Alla Diid?
Ilxaad ama Alla diidis waa mad-hab ku dhisan inkiraadda jiritaanka Alle abuuray, asalkeeduna waa

kalmadda (ATHEOS) oo luqadda gririigga ku ah qof aan Ilaah aaminsaneyn.
Waxaa jiro ilaa dhowr magac oo isku micna dhaw una baahan in mid waliba gooni loo qeexo, waana sidan:

MULXID: waa qof aanan rumeysneyn jiritaanka Alle iyo diin.

DIINLAAWE: waa magaca loo yaqaan kuwa aan diidaneyn jiritaanka Alle laakiin aan aaminsaneyn wax diin ah.

DIIN DIID: waa marka uu mulxidka caddeysto Colaad ka dhan ah Alle, diinta iyo dadka diimaha ku dhaqmo.

RUBUUBIYIIN: dad aaminsan inuu jiro Rabbi abuuray koonkan laakiin diidan jiritaanka cid uu soo diray iyo diin uu usoo dhiibay.

HUBANTI LA'AAN: waa qolo aaminsan in jiritaanka Ilaahay iyo dhimashada kaddib waxa ku saabsan, aanan loo haynin wax caddeyma ah jiritaankooda, sidoo kalena aanan la haynin wax lagu diido ama lagu inkiro, marka inta ay wax kala cadaanayaan mana rumeyneyno mana diidayno.

Goorma ayuu soo ifbaxay Ilxaadku?
Ma jirto taariikh xaddidan oo la dhihi karo waa ambaqaadkii fikirka ilxaadka ee alla iyo diintaba la colka ah, tan iyo intii koonka la abuuray waa ay jirtay doodda xaqa iyo baadilka, alla rumeyn iyo alla diid.
Qoraaga la yiraahdo Ramsiis Ciwad waxa uu leeyahay "Ilxaadka kuma bilaaban markii hore diidmada jiritaanka Alle, ee waxa uu ku billawday diidmada

fikirka hoggaanka Kaniisadda iyo hab dhaqankooda, maadaama ay hoggaanka kaniisadda ay lahaayeen gacan sarreynta hoggaanka diimeed, kan siyaasadeed iyo kan dhaqaaleba, ma aheyn mid fudud in mulxidniitu caddeystaan fikirkooda, dadka lagu tuhmo in ay yihiin mulxiddiinna waxa ay ahaayeen kuwa aan sumcad ku dhex laheyn bulshada, taasoo ku qasbi jirtay in ay qoraalladooda kusoo gudbiyaan magacyo aanan la aqoon".

Professor Julianne Begenau waxa uu leeyahay "kacaankii faransiiska 1789kii waxa uu ahaa marxaladdii ugu muhiimsanadeyd ee daaha laga rogay doodaha la xariirto Alla iyo diinta".

Kacaanka faransiiska waxa saldhig u ahaa in la iska dul qaado heeryada boqortooyada iyo kaniisadda oo isu baheystay musuq, maamul xumo iyo cabburinta dadweynaha, taasoo kacaanka halku dhegyadii ugu caansanaa ay kamid aheyd "Ku marjiya boqorka ugu danbeeya xiidmaha wadaadka ugu danbeeya" yacni hal mar halaga wada takhalluso boqortooyada iyo kaniisaddaba, taasi oo doodda asalka ilxaadka u yeeleysa ujeedooyin siyaasadeed iyo kuwa nololeed ee bulshooyinkii uu kasoo billawday.

La soco Q2aad ee duruufaha shakhsi iyo tan bulsho ee kaalinta ku lahaa hanaqaadka Ilaxaadka ee waddamada Galbeedka.

Maxamed Cabdullaahi Goosaar

Sida aan gabagabadii qormadeenii hore kusoo xusnay waxa aan qeybtan ku lafa guri doonaa sida uu Ilxaadka ku billawday, duruufahii kala gadisnaa ee saameynta ugu weyn ku yeeshay dadkii ugu cadcaddaa ama aadka uga dhex muuqday fikirka Ilxaadka, iyo heerarkii kala duwanaa ee uu soo maray, taasoo noo caddeyn doonto in Ilxaadkuba ku yimid felcelis ku aadan waxa qof ama kooxi si un uga biya diidsaneyd.
Qoraaga caanka ee  Paul Votz oo khabiir ku ah cilmu nafsiga iyo ilxaadka  waxa uu leeyahay "qof kasta oo mulxid ah (alla diid) oo ku adadag aragtiyaddiisa ilxaadka si kastoo uu usoo bandhigo sababo cilmi iyo kuwa Caqli gal ah oo ku riixay inuu qaato fikirka Ilxaadka waxaa mar waliba soo ifbaxo sababo nafsi ah, kuwa shakhsiyadeed ama kuwa bulsho oo lahaa sababta uu Ilxaadka u doortay".
Nuxurka dooddiisa waa qofka qaata Ilxaadka inta badan waxaa ku dhaliyo marka hore waa duruufo u gaar ah qof ahaan ama bulsha ahaan, kaddib ayuu qofkaasi raadiyaa sababa cilmi iyo caqli oo uu ku sheego iney tahay sababaha ka danbeeyo mulxidnimadiisa.
Dr. Cumar Shariif oo wax ka qoro arimaha Ilxaadka waxa uu leeyahay "sadaxda saameyn ee niyad ahaan, qof ahaan iyo bulsha ahaan ee ilxaadka waxa aan saldhig uga dhigi karnaa inaan isku xirno qofka da'diisa iyo wacyigiisa" isaga oo ula jeedo in saameeyayaasha qofeed ama nafeed ay xoog badanyihiin markastoo qofku ilxaadka ku qaato dhalinyaranimo.
Khabiirka cilmu nafsiga ee la yiraahdo  Benyamin Hilhami waxa uu daraasad ka sameeyay duruufaha nafsi ee xubna gaarayo 320 oo ka tirsan urur la yiraahdo "Midowga Mareykanka ee horusocdnimada

Alladiidka” waxa ay noqotay natiijadii kasoo baxday daraasadiisa sidan:

50% ka badan dadka qaatay fikirka ilxaadka ayagoon gaarin 20 jir waxa ay ahaayeen kuwa ayagoo yar waayay mid ama labadii waalid ee dhashay, iyo intooda badan aysan kusoo barbaarin nolol dhallaanimo oo xasilan.

Kani waxa uu Alla diid u noqday in ay is yeelan waayeen wanaag badnidii uu filanayay iyo nolasha adag ee uu la kulmay, waxa hoos u dhacay yididiishiisii, waxa uu indhaha ku kala qaaday duni sharta ay hareysay, ma noqon sidii uu ka fahmay waalidkiis markuu yaraa.

Tani waa gabar ku barbaartay jawi iimaan ka jiro, laakiin markii ay banaanka usoo baxday adkeysi uma yeelan shakigii u horeeyay ee iimaankeeda la galiyay.

Kani waa mid kusoo barbaaray canaan, caga jugleyn iyo dareensiin inuu yahay mid aan dadnimo laheyn, markii uu hana qaaday waxa uu ku gadooday wax kasta xitaa awooddii qarsooneyd ee ku abuurtay awood uu ku gadoodi karo.

Kani waxa hortiisa lagu dilay saaxiibtiis, waxa dilay burcad baad ka dooneysay.

Natiijadan waxaa taageeray Paul Vitz oo ku doodayo in Aabaha uu ku leeyahay kaalin halbowle sameysanka nafsiyadda Ilmaha ee ku wajahan Rumeynta Alle ama Alla diidnimada.
Waxa ay inta badan isku raaceen khubarada u leh

aqoon durugsan Arimaha Ilxaadka in qoyska uu aabbaha inta badan ka maqanyahay oo aanan la laheyn xiriir dhaw oo ka warqabid ilmaha, iyo aabaha marwaliba joogo laakiin ilmaha kula dhaqmo si arxan darra ah iyo daryeel la'aan, in labadaba ilmahaas halis u noqdaan qaadashada fikirka ilxaadka.
Sigmund Freud oo lagu tilmaamo hoggaamiyaha ruuxiga ah ee Alla diidka waxa uu leeyahay, markastoo ay meesha ka baxdo saameynta talada aabaha ilmuhu waxaa u sahlan in ay lumiyaan iimaankooda.
Waxaa dib laga ogaaday in Freud naftiisa uu kamid yahay ilmaha ay saameynta nafeed ee ka dhalatay waalid la'aanta darteed u qaatay fikirka Ilxaadka.
Sigmund Freud, sabab u raadinta ilxaadka waxa ay la gashay meelaha ugu xun ee caqliga fiyow uusan qaadan Karin, waxa uu alifay aragti uu ugu magac daray "urugadii Oodib" "Oedipus complex" taasoo uu leeyahay xilli aad u fog ayaa ilmaha waxa uu damac galmo ka galay hooyadii dhashay, si ay damacooda u meel mariyaan waxaa qasab noqotay in ay aabihii ka takhalusaan, markii ay aabihii dileenna waxa ay dareemeen in ay galeen danbi weyn taasina ku dhalisay in markii hore ay nin walba aabbe ka dhigtaan, markii danbe waxa ay go'aansadeen in ay niyadda ku dhistaan aabbe weyn oo samada ku jiro oo la yiraahdo Ilaah waana halka ay ka timid  fikradda jiritaanka Ilaahay iyo diimahaba.
Sidaasi si lamid ah dhalinyara badan oo muslim ahaa kuna nool waddamada Islaamka iyo carabta waxa ay miciin bideen Ilxaadka, kaddib markii ay ka niyad jabeen duruufaha nololeed iyo tan siyaasadeed intaba ee dalalka Islaamka iyo carabta.
Dr. Cumar Shariif waxa uu leeyahay: "markaan dib u eego doodahii aan la qaatay dhalinyarada mulxidiinta

ah ee waddamada carabta waxaa iisoo baxday in aysan wax waqti iyo dadaal ah ku bixinin marmarsiinyooyinka caqliyeysan ee ay sabab uga dhigayaan ilxaadkooda, xitaa kuwa saxnimada quraanka iyo rasuulka doodaha galinaya iskuma aysan dhibin in ay akhriyaan jawaabaha laga qoray arimahaas.
Dr. Cumar Shariif waxa uu kusoo khatimay hadalkiisa "waxaa ii caddaatay in dhalinyaradeena ay go'aan diidma ah ka qaateen waxa ugu muhiimsan nolasha aadanaha oo ah (jiritaanka Ilaahay) ayagoo aanan ku bixinin waqti iyo maskax".
Qeybta soo socoto waxa aan ku qaadaa dhigi doonaa duruufaha bulsho iyo tan siyaasadeed ee qeybta ka aheyd soo if baxii fikirka ilxaadka.
Waa maxay Ilxaadka ama Alladiidka

Qormadii na dhaaftay waxaan kaga soo hadalnay duruufaha shakhsi iyo nololeed ee dadkii hormuudka u ahaa fikirka Alladiidka, iyo sida ay xeel dheerayaasha cilmunafsiga isugu xireen u nuglaanta qaadashada fikirkaas iyo duruufahii nololeed ee lasoo darsay.
Qormadana oo ah tii sadaxaad ee aan kaga hadleyno Ilxaadka ama Alladiidka sida af soomaaliga lagu yiraahdo, waxaan kaga hadleynaa "Duruufaha Bulsho ee jiray xilligii uu hana qaaday fikirkan".
Qarniyadii dhexe ee loo yaqaan "Middle Ages" oo ah tobanka Qarni ee u dhexeysay Qarnigii 6aad illaa Qarnigii 16aad, qaaradda Yurub waxa ay soo martay duruufo nololeed, caafimaad ahaan, siyaasad ahaan, iyo diin ahaan kuwii ugu xumaa ee abid taariikhda Yurub ay xusto, waxa ka dhacay dagaallo qaraar, waxaa ka dillaacay abaaro aad u ba'an, waxa ku baahay daacuun safmar ah oo la magac baxay "The Black

Death", kaasoo ay ku dhinteen tiro lagu qiyaasay 1/3 dadkii Yurub ku noolaa xilligaas.
Sidoo kale waxa is baheystay boqortooyo musuq badan iyo kaniisadda oo shacabka u garba duubi jirtay boqortooyada una sheegi jirtay in boqorku yahay hooskii Ilaahay ee arlada ciddii boqorka caasisana ay Allah ku caasisay.
Waxa ay boqortooyadana la dagaallami jirtay dhaqdhaqaaqyada aqooneed iyo isku day kastoo la xiriiro fikir cusub iyo hal abuur cilmiyeed, waxaa la xirxiri jiray la maxkamadeyn jiray cid kastoo sheegto wax ka baxsan waxa bibleka ku qoran, waxaa la gubi jiray buugaagta iyo qoraallada aqoonyahnnada culuumta dhabiiciga ah, waxaa buux dhaafiyay xabsigii caanka ahaa ee Pastel, kaasoo la dhagax dhigay sanadkii 1370kii miilaadiga, dhismahiisana waxa uu socday muddo 12 sano ah, ujeeddada markii hore loo dhisayna waxa ay aheyd inuu noqdo qalcad lagu sugo ammaanka magaalada Paris oo hadda ah caasimadda Faransiiska, kaddib waxaa loo badalay Xabsi lagu aruuriyo dadka aan siyaasad ahaan la dhacsaneyn Boqortooyada ama fikir ahaan khilaafsan Baadariyada kaniisadda, sadax qarni kadib waxa uu noqday halkii uu ka dhaqaaqay kacdoonkii lagu jabiyay Boqortooyadii iyo Kaniisaddii isgaashaan buursanayay.
Dadweyne careysan ayaa 14 July 1789kii xoog ku galay xabsiga kuna guuleystay inay oodda ka rogaan maxaabiis boqolaal ah oo ku xareysnaa, diiwaanka maalinkaas loogu tagay xabsiga waxa uu dhigayay in tan iyo mudadii la bilaabay in loo adeegsado xabsi ahaan lagu soo xiray dad gaarayo 5279 qof.
Sida dabiiciga ah marka ummad mudda badan kusoo jirtay caburin iyo cadaadis marka ay hesho jawi xoriyad leh waxaa soo if baxdo cadaawadda gaamurtay ee loo

qaado ciddii ka masuulka aheyd gabood falkii soo dhacay muddadaas. Haddaba waxii u horeeyay ee kacaankii uu salka u dhigay waxa uu noqday yagleelidda waxa loo yaqaanno "Secularism" ama "Cilmaaniya" oo Diinta iyo Siyaasadda la kala madax banneyo, Diinta aysan wax saameyn ah ku laheyn siyaasadda iyo nolashaba, dadkana xor u yihiin mowqifkooda ku aaddan diinta.
Xoriyaddii laga dhaxlay kacaanka kuma ekaanin arimaha siyaasadda ee waxaa dood furan la galiyay jiritaanka Alle iyo asalka diimaha, taasoo cid aqoon leh iyo cid aysan u bilaawneyn u sintay aragti ka dhiibashada jiritaanka Ilaahay iyo asalka diimaha, natiijadiina waxa ay noqotay in doodaha qaar ay tibaaxaan inuusanba jirin wax la dhaho Ilaahay, ayagoo ku andacoonayo in adduunka iskiis u abuurmay dadkuna u fakaraan habkii ay u noolaan lahaayeen kaliyah. Intaas kuma aysan ekaane waxa ay ku doodeen in dadku Ilaah u yaqaanaan waxii ay aqoontoodu gaari wayso, oo markastoo uu hab fikirka aqooneed horumar sameeyo waxaa soo yaraanayo ku tiirsanaanta awood sare oo mala awaal ah oo loo yaqaan Ilaah, waa sida ay ku doodeene, hase ahaatee Soomaalibaa horay ugu maahmaahday Nin kaligii garamay iyo Nin dhul toogtay midna ma gafaan.
In badan oo carabta iyo muslimiinta ah ayaa duuduub u liqay dood noocaas ah ayagoo xeerinin maxaa kala duwanaansha duruufeed iyo waqtiyeed oo u dhexeyn karo dunida muslimka iyo galbeedka? Annaga ka muslim ahaan dib u dhaca na haysto ma mid masaajidka u sabab yahaa oo u baahan inaan ka xorowno mise waa dib u dhac dhaqan, dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeed oo sababo gudaha iyo kuwa dibada lehbaa? maxaa farqi u dhexeyo hab-dhiska

kaniisadda iyo dowrkeeda diineed ee xilligaas marka la barbardhigo tan muslimiinta? is weydiimahaas iyo kuwa kale oo badan ayadoon jawaabtooda leysku dhibin ayaa dusha lasoo saartay.
Hadduu Alla yiraahdo qormadeena soo socoto waxaan kaga hadli doonaa dadka mulxiddiinta ah ama alla diidka ah doodaha ay qabaan marka ay Islaamka ka hadlayaan iyo sababaha ay kaga biya diideen.

"dadka mulxiddiinta ah ama alladiidka ah doodaha ay qabaan marka ay Islaamka ka hadlayaan iyo sababaha ay kaga biya diideen" haddaba intaanan u gudbin nuxurka qormada waxa aan jeclahay inaan ka hormariyo afeef ah in Qormadan aysan aheyn mid aan kula doodeynno mulxidiinta ama aan ugu tala galnay inaan jawaaba kaga bixino eedahooda, ee waa mid aan ugu talagallay in akhristaha Soomaaliyeed aan ugu iftiiminno jiritaanka fikirka Ilxaadka ama Alladiidka, asalkiisa halka uu ku abtirsado iyo halkuu geedigiisa u raranyahay.
Waa ay jiraan doodo lala galay iyo jawaaba laga bixiyay dulucda doodahooda, walina waa ay socotaa, qoraal iyo muuqaallaba waa laga sameeyay, dunida carabta, laakiin Soomaaliya wali heerkaasi ma gaarin, sababtuna waa Alladiidka Soomaaliyeed oo ah mashruuc bilaaw ah, inta badan dadka ku qancay oo aan gaarin heer ay bannaanka isasoo dhigaan, sababa la xariira duruufaha amni ee dalka ka jiro, ka baqidda culeys kaga yimaado qoysaskooda iyo qeybaha kale bulshada, inbadan oo kamida waxa ay u qaateen alladiidnimada si laab la kac ah mana ahan kuwa u

diyaarsan difaacashada waxa ay qaateen, taasoo ka dhigeysa xaaladda Alladiidka Soomaaliyeed mid mugdi badan ku gadaamanyahay, tira koob sax ahna aanan laga haynin, kuna kala firirsan gudaha iyo dibaddaba, laakiin baraha bulshada aad looga dheehan karo dhaqdhaqaaqyadooda.

Marka aad dhuuxdid qoraallada iyo aragti dhiibashada dhalinta alladiidnimada calmatay doodahooda ka dhanka ah Ilaahay iyo diintiisa waxa ay beegsataa arimahan soo socdo:

Jiritaanka Ilaahay: marka ay timaaddo waxa ay kala baxaan laba qeybood, qeyb tiraahdo Annagu ma aaminsanin jiritaanka wax la yiraahdo Ilaah, Adduunkan waa mid iskiis u sameysmay oo dabeecadu sameysay, ayadaana mar waliba is dheelitirto si ay nolasho usii socoto, waxa kaliya ee la aamini karo waa un waxii tijaabo cilmiyeed lagaga salgaaro, waxii kasoo harayna waa un faataa dhug ama kutiri-kuteen qaan gaartay, diidmadaas kuma ekaadaane waxa ay weerar afka ah ku qaadaan danta Ilaahay ka leeyahay adduunkan, waxa ay su'aalo galiyaan sababta uu u abuuray sharta, faqriga iyo colaadaha. Waxaa jirto qeyb labaad oo rumeysan jiritaanka Ilaahay ama awood sare oo ka danbeyso abuuranka adduunka, laakiin diidan jiritaanka wax calaaqa ah oo ka dhexeyso ayaga iyo Ilaahaas.

Rasuulkii Alla soo diray: waxa ay ka simanyihiin in si aan gabbad laheyn geeska ugu daruuraan saxnimada nabinimadiisa iyo in xag Alla lagala soo hadlay, waxa ay ku doodayaan in aysan haynin wax caddeyn ah oo ay taaban karaan inuu yahay ergay xag Alle laga soo wakiishay, qaar waxa ay u hadlaan si ka baxsan anshaxa aanan u qalmin maqaamka nabiga inaan halkaan kusoo gudbiyo.

Quraanka Kariimka ah: waxa ay si duuduub ah u diidaan inuu yahay hadal Ilaahay, mar waxey yiraahdaan waa mid xilliyeysnaa oo dadkii Nabiga la noolaa ku socday, oo dunidan horumartay aanan waxba ka galin, mar waxa ay yiraahdaan waa diin carbeed oo inta afka carabiga ku hadasho ugaar ah, mar waxa ay yiraahdaan wuu iska hor imaanayaa wuuna is burinayaa, mar waxey yiraahdaan sayniska ayuu ka hor imaanayaa, marar waxa ay beegsadaan mawaadiic gaar ah sida addoonsiga aadanaha oo lid ku ah xuquuqul insaaka.

Xaaladda nololeed iyo dib u dhac ka jiro dunida muslimka ah waxa ay u tiiriyaan in Islaamku sabab u yahay, oo dunida ka xorowday diimaha ay horumar gaartay.

Waxaa xusid mudan in doodaha Alladiidka Soomaalida ee ku aadan Islaamka ay yihiin dooddo dhinac ka raran, ka dhar la' caddaaladda iyo ammaana naqdinta cilmiga ku dhisan, waxa ay shaki galiyaan aragti walboo islaamka ka qabo nolasha, waxa ay marag madoonto ka dhigaan eedeyn walba oo kuwa Islaamka la col ah islaamka u jeediyaan.

Mid baa diiday in wax qabadkii dowladdii Cumar Bin Khadhaab laga dhigo wanaag Islaamku leeyahay asagoo ku dooday Cumar baa kartidiisa iyo ragannimadiisa ku keensaday, isla fadhigii ayuu ku dooday in falalka daacish iyo kooxaha la midka aysan aheyn ijtihaad qaldan oo shakhsiyaad la yimaadeen ee ay tahay mid Islaamka nuxurkiisa ah.

Soo heli meysid hal daraaso ama maqaal oo si cilmiyeysan Alladiidka Soomaaliga ah ay ku lafa gurayaan doodahooda, wax ka sheegga Islaamka waxa ay u cuskadaan Yutuberska Alladiidka carabta iyo reer Galbeedka ee Islaamka la colka ah, oo iyaga qudhooda

ku yartahay is xilqaamka ilaalinta amaanada fikirka.
Waxa ay si ula kac ah u xushaan meelaha ay is leeyihiin weerarkiina wuu ka shiish qaadan karaa, ayagoo misena iska indha tiro jawaabaha ay ka bixiyeen culimada Islaamka, waxa uu jecel yahay mulxidka Soomaaliga ah inuu jilo dowrkii Abuujahal iyo Abuulahab, hadana waxa uu dhaliil u arkaa in muslimka la doodayo uu soo daliilsado mawaaqifta iyo aragtiyada culimada Islaamka.
Haddaba waxaa muhiim ah inaan dib u jaleecno xilligii Nabi Muxamad lasoo saaray NNKH waxaa si cad uga horyimid oo dagaal af iyo addin ahba ku qaaday in badan oo ka mid ah dadkii noolaa xiligiisii, ha noqdaan reer Qureysheed iyo qoyskii uu asaga ka dhashay ama ha noqdaano kuwa ka baxsan, Quraanka kariimka ahna waxa uu nasoo gaarsiiyay eedeymo kala duwan oo ku wajahan nabiga shakhsiyaddiisa iyo risaaladiisa labadaba, waxaana kamid ah eedahaas: (in Ilaahayadii badnaa uu mid kasoo reebay, inuu nin waalli iyo sixir qaba uu yahay, inuu la yimid howl ugub ah oo aanan awoowyaashii hore aanan laga soo gaarin, suurtagalnimada inay ka tagaan diintii dhaxalka awoowyaal qaataanna middan cusub ee Muxamad, iyo kuwa lamid ah).
Markii si deggen loo eego eedahaas iyo aragtiyaha ay ka duulayeen waxaa la dhihi karaa waa mid laga filan karay, bulshadii uu kasoo dhex baxay Nabi Muxamad NNKH, laakiin qof muslim ah kana soo jeedo bulsho qarniyaal badan muslim aheyd waliba aysan ka dhex jirin diima kale oo aan Islaamka aheyn inuu qaato mawaaqif aad u fog oo lid ku ah dhammaan wax kastoo ka tarjumaayo heybtiisa diineed ee muslimnimo waa arrin u baahaan sababeyn hufan kana fog laablakac iyo meel gaaban ka eegis, waana midda aan

ku qaadaa dhigi doonno qormadeena soo socoto ee 5aad hadduu Alla nagu simo.

Waa Maxay Ilxaad ama Alladiid?

Gunaanadkii qormadeenii udanbeysay waxaan ballan qaaday inaan kaga hadli doono sababaha ku keeni karo qof muslim ah kana soo jeedo bulsho qarniyaal badan muslim aheyd waliba aysan ka dhex jirin diima kale oo aan Islaamka aheyn inuu qaato mawaaqif aad u fog oo lid ku ah dhammaan wax kastoo ka tarjumaayo heybtiisa diineed ee muslimnimo.

Hadaba waxaa xusid mudan in hanuunka iyo garashada jidka Ilaahay aysan ku imaanin garasho iyo rabitaanka qof oo kaliyah, ka muslim ahaan waxa ay quraanka meela badan kusoo aroortay aayad micnaheeda uu yahay "in Ilaahay mid nool kasoo saaro mid meyd ah, halka mid meyd ahna kasoo saaro mid nool" taasi oo lagu fasiray in Ilaahay qof muslim ah faraciisa kasoo saaro mid gaal ah, mid gaal ah faraciisana kasoo saaro mid Muslim ah, Nabi Nuux NNKH xilligii dadkii diiday biyaha lagu harqiyay waxaa kamid ah dadkii la harqiyay wiilkiisii oo diiday inuu isaga soo raaco, sidoo kale waxaa xaqii hareer martay xaaskii Nabi Luudh NNKH, halka Aasiya oo ah xaaskii Fircoon oo ah nin Ilaahnimo sheegtay aysan ku raacin o xaqqa Alle haleeshiiyay, ugu danbeyn waxa uu quraanka inoo sheegay in Nabi Muxammad NNKH lagu canaantay in hanuunku uusan ku imaan ciddaad la jeclaatid ee Alle un inuu yahay kan hanuunka bixiyo.

Sidaa darteed waxa la yaabka leh ma ahan in qof muslim ahaa diinta iyo Alle ku gadoodo oo gaalnimo doorto, waxaase noo muhiim ah maxaa sababa ah oo

qofka ka leexin karo waddadii Islaamka, gaar ahaan dhalinteenna Soomaaliyeed ee hadda calmaday Alladiidnimada?
Mar haddeysan jirin qeyb muuqato oo bulshada kamid ah, oo utaagan Alladiidnimo, sida aan qormadeenii hore ku xusnayna ah dad ku dhexmilan bulshada gudaha iyo dibada, raadkooda iyo dhaqdhaaqyadooda laga dheehan karo baraha bulshada waxa aan halkaan aqristayaasha kula wadaagayaa sababa dhowr ah oo aniga aan u tiirin karo waxa ku riixay dhalintaasi in ay seeraha islaamka weydaartaan, waa ay jiri karaan sababa aanan xusin ama iga maqan, si lamid ah sababaha aan xusay qaar kamid ah ama dhammaan waa ay noqon karaan kuwa la igu khilaafi karo.
Sababahaasi waxaa kamid ah:

Sababa diineed:

Fahamka: qofka aqoontiisa diineed oo yar ama fahamkiisa oo adag dartiis waxaa soo wajahi karo arrimo isaga aragtidiisa ula muuqda kuwa is diidan ama aanan maangal la aheyn, qofkaasi hadduusan helin cid si deggen ula doodda una fahamsiiso waxa ka qaldan waxa uu tilaabta koowaad u qaadayaa dhanka luminta kalsoonidii uu ku qabay saxnimadii diintiisa, nin kamid ah dhalinta aanu ka hadleyno ayaa isagoo yar walina aan ardaynimadii ka bixin waxa uu dhageystay cashar tafsiir ah, suuratu Muxammad aayadda 15aad ee ka sheekeyneysa wabiyada khamrada iyo caanaha ee jannada, markiiba waxa uu is weydiiyay sey macquul ku tahay webiyaal khamra iyo caana ah? Kaddib aabbihiis oo sheekh ahaa ayuu su’aalay suurtagalnimada waxa aayadda ka hadli, nasiib darrro halkii uu jawaab ka sugayay wadaadkii canaan ayuu

kala dul dhacay, inankii yaraa isagoo mooraal ahaan u dilan, su'aashiina aanan laga shaafinin ayuu halkii ka tagay, taasi diinta ugama tagin laakiin waxa ay aheyd billaawgii luminta kalsoonida, inankii asaga ahaa oo horay usoo akhristay kitaabka Suwar min xayaati saxaaba oo ah kitaab nin suugaanyahan uu qoray kuna taaktaaksaday ammaanta saxaabada, sara u qaadidda sha'nigooda ayaa waxa uu waqti u helay inuu ku tixmo kitaab kale oo ka sheekeynayo dagaalladii Safeyn iyo Jamal ee dhex maray saxaabada iyo tirooyinkii ay iska dileen. Meeshaasina waxa uu ku lumiyay xushmadii iyo ixtiraamkii uu u hayay saxaabada, waxuu sidoo kale gacanta ka taagtay inuu diin ahaan u qaato axaadiista ay soo wariyeen saxaabadii oo dhan, mudda aanan dheereyn waxa uu isku qanciyay axaadiista uu diiday iyo quraankaba isku meel beey nooga yimaadeen, quraankiina cagtuu ku dhuftay.

Ku dhaqanka: ku dhaqanka diinta iyo amarada fulinta ama ka haridda ee ay bixineyso ma ahan mid sahlan qof walibana u sahlan, waxa ayna kamid tahay meelaha dhalin badan ay ku sibqadeen, dhalintaasina waa laba qeybood, qeyb xagjirnimo dheeraad ah la timid iskuna daydo in xaraf xaraf u dhaqan galiyaan islaamka ayagoon tixgalinin duruufahooda shakhsi tan qoys iyo tan bulsho intaba, waxa ay isku adkeeyaan wax kastoo loobaahnaa in la dhexdhexeysto, taasi oo mudda kadib ku keento daal iyo kalsooni darro, nafta oo si halhaleel ah ula aaddo macmacaankii nolasha ee muddo laga hortaagnaa, qofka waa insaan oo khalad waa ka dhacayaa laakiin dhibaatada halkii khaladkiisa ka daaweyn lahaa ayuu raadiyaa cid uu ku eedeeyo fashalkiisa, marka hore sheekhiisii iyo inta ka ag dhaw ayuu eedda saaraa, kadibna diinta qudheeda ayuu la

fuulaa, sidaasi si lamid ah waa dhalinta kuwaasi lidkooda ah waligoodba aan sadax salaadood oo isku xigto aanan waqtigeeda ku tukan, mar waliba waxa ka xoog badan naftooda iyo rabitaankeeda, muddo kadib markuu dareemo in bulshada iyo asagu isku dhan u soconin il dhaliil iyo yasid aan ka marneyna lagu eego mar waliba, isma weydiinayo xaggey wax ka qaldanyihiin ee waxa uu bilaabaa falcelis degdeg ah, waxa uu la coloobayaa cid walba oo bulshada kadhex muuqato aragti ahaanna aysan is waafiqi Karin, waxa uu kusoo dhacayaa waddadii saaxiibkiis xagjirka ah oo ah fashalkiisa u saariyo culimada iyo diintaba kadibna halkaa kaga dhawaaqo gadood alle ka dhan ah.

Tiknooloojiyadda casriga ah: Internetka waa seef laba af leh, nacfi badan waa leeyahay oo masaafooyin, waqti iyo dhaqaale badan ayey baajisay oo adduunkii ayey soo koobtay, dhanka kale adeegsigeeda waxa uu sinaaday nin dani ka dhacdo iyo mid danlaawe ah, mid aqoon leh iyo alifbeetada mid aanay waxba u wehlinin, nin aqoontiisa diineed heer fiican joogto iyo mid aqoontiisa diineed ay tahay inuu luqadda carabiga wax uga bilaabanyihiin, intaasoo dhan ayaa jaanis isku mid ah u helay xogta dhex ceegaagta Internetka, xogtaasi waxaa kamid ah mashaariic ay dawlado iyo kaniisado maal galiyaan oo loogu tala galay in Islaamka ku qaadaan weerar ku wajahan wiiqidda kalsoonida saxnimada quraanka iyo guud ahaan diintaba kuna wajahan dadka muslimka ah, waa ay iska caddahay natiijada ay leedahay marka qof markii horeba aanan diintiisa aqoon mugleh u laheyn amaba iimaankiisa uusan xoogganeyn oo dhibaata ku qabay ku dhaqanka shacaa’irta islaamka.

Hoggaan: burburkii dowladdii dhex waxa soo if baxay Ururo diineed oo dhowr ah, kuwaasoo xoogga saarayay dhalinyarada hadafka ay markaasi ku howl galinayeen dhalinyarada waxa uu ahaa “dib u yagleelidda khilaafadii Islaamka”. Waxaa aad loo kicin jiray dareenka dhalinyarada ayagoo loo adeegsanayo quraanka, taariikhda jihaadka ee Islaamka iyo anaashiid xammaasad leh oo carabaha laga keenay, taasi dhalinyara badan oo diin jecel ku ridday is dhiibid indha la’aan ah oo ay gacanta u galeen rag muuqaal culimo leh laakiin maanka ka ah hoggaamiye kooxeedyo, waxa qaar dhalinta kamid ah lagu shubay dagaalo loogu sheegay halgan barakeysan oo Islaamka lagu soo celinaa, qaarbaa ku dhintay qaarna ku dhaawacmay, qaar mooraal ahaan bey u noqdeen dhibanayaal aan cidna dhabiibeyn, halka inta badan ragii dhalinta dabka ku shubay ay isu badaleen ganacsato siyaasiyiin iyo qurba joog iska dhiibay dalalkii la rabay in lagu jihaado, qaar kaloo kamid ah dhalintaas waxa ay goob joog u noqdeen musuqmaasuq kii u xumaa oo ay ku dhaqmayaan hoggaanka urur diimeedkooda, lacag samafale carbeed soo sadaqeystay oo la lunsado, deeq wax barasho oo la musuqo, nin kamid ah dhalintii soo martay ururadaas ayaa 22.03.2020 qoray comment ah inuu goob joog usoo noqday mashruuc afurin dad sooman oo goballada dalka loogu tala galay ineysan xamar dhaafin ayadoo boorarkii goballada loogu tala galay xamar dad joogo sawiro looga qaaday, yacni hal habeen oo dad meel lagu afuriyay ayaa laga dhigaa in 18 gobal ee Soomaaliya laga fuliyay. Inbadan oo dhalintii xarakaadka Islaamiga ah waxa ay kala saari waayeen kaalinta hoggaan ee culimadaas u matalayeen iyo in aysan Ilaah wakiil uga aheyn qof walibana tiisa lagula

xisaabtamaa, hase ahaatee waxaa xaqiiqa ah in hoggaankii ururada Islaamiga ah ay masuuliyadda qeyb weyn ku leeyihiin in dhalinyara badan Islaamka ka beyraan. Inta aysan wadaadada saxwada la wareegin hoggaanka diineed ee dalka waxaa joogi jiray dariiqooyin nin tukada iyo mid aanan tukanba ka siyaareysto laakiin aan siyaasadda iyo dhaqaalahaba ku garbinin, waxaase badalay wadaad futashaari wato mansab iyo maalba asaga isla rabo haddii lagu qabsadana daliil jeebka kala soo baxaa kuwaasoo inbadan ka qeyb qaatay in Islaamka laga qaato mawaaqif aanu raadkeedu fiicneyn. Intaasi waxa dheer dadka manta ixtikaarka ku haysto ku hadalka magaca Islaamka ma ahan dad u diyaar ah horumarinta wacyigooda wax ka baxsan laqbada naska, ma awoodaan inay qanciyaan qof shaki yar qabo, waxa ay dhiibtaan oraahya la dhihi karo waxa ay fududeeyaan qofkii shakiga yar qabay inuu sii fogaado.

Ilbaxnimo: mujtamaca Soomaaliga waa mujtamac asal ahaan nolasha baadiyaha kasoo jeedo, waa reer Guuraa aad ujecel naq raaca, markii magaalada lasoo galay inbadan oo dhaqan kaasi ah wali saameyn ayuu ku leeyahay Soomaalida, qiso afka maayga ah oo aanan hadda sideedii usoo warin karin ayaa aheyd nin magaalada kusoo horeeyay waxa uu dardaaran reer magaalnimo siiyay dhalin qaraabadiisa ah oo dhawaan baadiyaha kasoo galay, waxa uuna kula dardaarmay sida tan: “ surwaal in ay xirtaan, sadax sadax isula socdaan, sigaar cabidna ay bartaan, cabitaanka qasan ay badsadaan” waxaan uga gol leeyahay qeyb kamid ah dhalintaan waxay gaalnimada u calmadeen ilbaxnimo raadin iyo hallagu yiraahdo wax uu dadka kaga duwanyahay ayuu la yimid carab ayaana hore ugu

maahmaahday “khaalif tucraf” khilaaf waa lagu baranayaaye

Shantii qormo ee hore waxaan si dul mar ah aan uga soo hadalnay waxa uu yahay Ilxaadka ama Alladiidka, taariikh ahaan bilaawgii meelahii ugu horeysay ee dunida iyo Soomaaliyaba, duruufahii saameynta ku lahaa, heerarkii uu soo maray iyo udub dhexaadka dooda Ilxaadka. Qormadeena maanta waxaan kaga hadleynaa wacyiga bulshadeena ee ku aaddan Ilxaadka ama Alladiidka.
Inkastoo aysan jirin daraasado ama cod bixin rasmi ah oo laga qaaday bulshada, haddana sadax qeybood oo bulshada ka tirsan xiriirka xooggan ee aan la leeyahay oo ah (saxaafadda, waxbarashada iyo wadaadada) waxey ii suurta galisay waayo aragnima iyo awood qiyaasidda muunad ka tarjumi karto wacyiga bulshada guud ahaan, iyo gaar ahaan hormuudkeedaba oo ku aaddan xaqiiqda Ilxaadka.
Waxaa jirto isla-eg gaboowday, waayahana caddeeyeen inaysan luga xoog leh ku taagneyn taasoo ah in Soomaalinimada lamid tahay Muslimnimo, yacni qof ka Soomaaliga ah inuu mar waliba muslim yahay, si kastoo usoo jireen tira isasoo tareysay marba marka xigta oo ah tira Soomaali ah oo Islaamka isaga tagay, haddana isma badalin inta badan aragtida Soomaalida ee ku aaddan isala-egta aan sare kusoo sheegay.
Tusaale haddaan maanta hooyadey ku iraahdo waxaa jiro qof Soomaali ah oo gaal ah waan hubaa ineysan si fudud iiga rumeysaneyn.
Haddaan tusaalaha mala awaal ah kasoo tago oo aan usoo gudubno mid nool tan iyo markii aan bilaabay qormooyinkan taxanaha ah waxaa isasoo tarayay

weydiimo iiga imaanaya asxaab badan oo la xiriirto sababta aan hadda uga hadlaayo arimaha Ilxaadka, jawaaba kala duwan oo aan ka bixiyay weydiimahaas falceliskii ka dhashay qaarbadan oo kamid ah waxa ay xoojinayaan raadka xoogga leh ee Isla-egtaas ku leedahay wacyiga bulshadeenna, qaar baa igu yiri waxa aad sheegtay waa war dareen leh inay jiraan Soomaali Allediid ah, qofbaa igu yiri warkaaga markaan xasuustaba wadnahaa I xanuuna.
Sanadkii 2015 ayaa Nin saaxiibkey ah waxa uu la kulmay nin kamid ah wadaadada ugu magaca dheer Soomaaliya waxa uu kala hadlay arin ah in burburkii dowladdii dhexe kaddib dalka aysan ka jirin idaacado ku baxo mowjadaha SW1 iyo SW2 oo gaaro deegaannada baadiyaha ee reer guuraaga ah, oo waxa hadda  dalkii ka shaqeeyo ey tahay idaacada FMka ah oo magaalooyinka waaweyn iyo tuulooyinka ku hareeraysan un gaara, taa badalkeedana ay jiraan idaacado kaniisado dalka dibaddiisa ah oo leh barnaamijyo ku baxo afka Soomaaliga, laguna sharxo cashar ah diinta kirishtaanka, kana baxo mowjadaha SW1, SW2 oo gaarayo kumannaan meyl oo ah dhulka Soomaalida oo ay ku jiraan reer guuraaga, taasoo ah khatar diineed oo aysan ku baraarugsaneyn waxa ay dhageysanayaan iyo halka laga soo tabiyo, marka miyaaney habbooneyn in la iska wareysto arintaas?
Jawaabtii sheekhii weynaa waxa ay noqotay, Adeer qof Soomaali ah uga baqi maayo inuu gaaloobee, waxaanse uga baqaa in caqiidda xummo lagu rido ee waxaad xog iga siisaa nashaadaadka shiicada ay dalka ka waddo?!
Jawaabtaas waxa ka muuqato in wadaadkaas laba shahaado iyo ka badan soo qaatay iyo hooyaday oo aanan waxbarasha diini ah iyo maadiba aan fursad u

helin ay isku mowqif ka taaganyihiin in qof Soomaali ah uu gaaloobi karo, diin kale ha qaato ama Ilxaad ha qaato, qoysas badan oo Soomaali ah ma aqbali karaan xaqiiqada ah in xubin qoyskooda ka mid ah lagu sheego gaalnimo, waxa ay u arkaan tilmaan aan habbooneyn waxna u dhimmi karto muuqaalkooda bulshada dhexdeeda, waxa ayna door bidaan in ay ku daboolaan, inkiraad, iska indha tirid iyo waliba u tiirin shirqool ka dhan ah ayaga ka qoys ahaan oo ay maleegeyso gacan gurracan.

Waa ay badanyihiin in isku mashquuliso dad ay masaa'il ama mawaaqif ku diidanyihiin inay diinta ka saaraan, ama xoogga saaro waxa diinta looga baxo oo qof isu haysto inuu wali muslim yahay u caddeeyo inuusan aheyn oo uu jabiyay qodobo halbawlo u ah islaamnimadiisa, laakiin ajendaha uguma jirto khatarta ay leedahay qof iskiis u go'aansaday inuu Islaamka isago baxo iyo wax kala gudboon bulshada.

Wacyi daridaasi ku aadan Ilxaadka ee ay Soomaali badan qabaan waxa ay sahashaa in Ilxaadku ku baaho si ka fudud sida laga maleysanayo, Ilxaadka waa mid ka mid ah cudurada bulshada ku dhaco markasta oo ay mareyso xilli kala guur ah, cudurna daawadiisa tillaabada ugu horeyso waa in la aqoonsadaa jiritaankiisa, tan xigtana la baadi goobo maxaa u daawa ah.

Dhammaan qeybaha bulshada waxaa la gudboon inay indhaha furaan, hareerahooda eegaan si fiijigan ula socdaan saaxiibadooda, xubnaha qoyska, ardayda iyo bulshada kala duwan ee ay la macaamilaan, waa inay ku baraarugaan in aysan maanta jirin duni kala xadeyso oo u kala seereysan gaal iyo muslim, waxa la joogaa casri ay isu furmeen xuduudaha caalamka dhanka fikirka iyo aqoonta, casri umadaha muslimka ah lagaga

gacan sareeyo hanashada tiirarka ilbaxnimada, casri qofka muslimka ah inta uu dhulkiisa kaga cararo macluul iyo amni xummo, kaddib magan galayo wadamada gaalada kuwaas oo u suurta galiyo heyb iyo nolol xasiloon oo sharci iyo kala danbeyn ka jirto.
Waxaa lagama maarmaan ah in la helo wacyi iyo garasho la jaan qaadi karo isbadallada socdo iyo jawaabaha lama huraanka u ah.
"waa inaan daaqadaha gurigeyga u balaqaa dabeylaha aqooneed ee xoogan, laakiin waa in aysan dabeylahaas  xididada ii siibin". Mahatma Gandi
Balanteenu waa qormada xigta iyo sidee looga hortagi karaa Ilxaadka.
WAA MAXAY ILXAAD AMA ALLADIID?

Qeybtii hore waxaan kusoo xusnay in bulshada  ay indhaha furto ogaatana in Ilxaadku yahay wax jiro oo guryaheena iyo hareeraheennaba laga heli karo, si looga hortagana aanu ubaahannahay inaan ku eegno indha fiira dheer. Qormadeenna maanta waxaan kaga hadleynaa maxaa nala gudboon si aan uga hortagno faafidda Ilxaadka ee bulshadeenna muslimka ah?
Waxay ila tahay haddii aan u dhigo ka hortagga Ilxaadka inay lamid tahay dagaal, dagaalku waxa uu leeyahay taaktiik iyo xirfado waxaana kamid ah dhufeysyo kala heer ah, Annaga dhufeysyadeennu waa saddax heer, Qoyska, Goobaha waxbarashada iyo Qoka Muslimka ah ka qof ahaan.
Kaalinta Qoyska
Qoyska waa dhufeyska ugu horeeyo ee laga difaaco xubnaha qoyska, difaaca waxyeellada jirka oo kaliya maahan difaaca wacyigiisa iyo garashadiisa, qoyska waa halka wax waliba saldhig u ah, waa halka laga qiyaas qaato mustaqbalka ubadka, markasta oo hab

barbaarintu ay noqoto mid isu dheeli tiran, jir ahaan iyo garaad ahaan waxa ay ifafaala wanaagsan ka bixisaa mustaqbalka garasho iyo nololeed ee Ilmaha, in ilmuhu ku barbaaraan jawi uu ka jiro wada hadal iyo ixtiraamka garaadka iyo karaamada qof ahaaneed ee yar iyo weynba waxa ay horseeddaa in garaadka ilmaha uu koro isagoo u bisil la fal galidda dagaal maskaxeedka dunida ka aloosan, waxa adkaaneysa inuu noqdo mid go'aanno uusan ka baaraan dagin si fudud ku qaato, sidoo kale waxa adkaaneysa in uu noqdo weel ay cid walba ku shubato waxa ay rabto.
Waxa si dhab ah loo ogaaday in ilmaha ku koro jawi cakiran oo laheyn xiriir wada hadal oo iyaga iyo waalidka ka dhexeya, ama ilmaha goob joog u noqdaan xiriir aan wanaagsaneyn oo dhexyaalo labada waalid inay mar waliba u nugulyiiin weerar kasta oo beegsanayo dhaxal kasta oo ku qaali ah qoys ahaan ama bulsho ahaan.
Marka ay timaaddo barbaarinta ubadka ee dhanka wax barashada iyo ku dhaqanka diinta, waaliddiin badan waxa ay ku fashilmaan isu dhiilitiridda riyada waalidka ee ku aadan mustaqbalka ubadkooda, iyo karaanka qof ahaaneed ee ilmaha iyo falgalayaasha saameynta leh ee ku xeeran ilmaha, qoyska iyo bulshadaba, waxa ay garab maraan dabeecadda dhallaanka iyo marxalad walba waxa ay naftooda jeceshahay, waxa ay ku cadaadiyaan cibaadada iyo xifdinta quraanka ayagoo waliba garaac iyo canaan aanan u rooneyn dareenka ilmaha kula kaco, ilma badan uur kutaalo ay ka qaadeen cadaadiskii yaraantooda ay kala kulmeen waalidkooda ee dhanka waxbarashada iyo diinta ayaa sabab u noqoto in ay fursadda u horeyso ee ay ka indha qarsadaan waalidka ay isbadal dhanka anshaxa iyo qaab fikirka ku fogaadaan.

Waa wax wanaagsan in ubadka waxbarashada lagula dadaalo, cibaadada iyo ku dhaqanka diintana lagu ababiyo, laakiin waa in la xeeriyaa duruufaha ilmaha in aabbe kasto duruuftii uu kusoo koray ama wax kusoo bartay mid aad uga badalan ay ubadkiisa ku jiraan.

Kaalinta Goobaha waxbarashada

Waagii hore waxbarashadu waxa ay soo saari jirtay dad dhan walba ka dhisan, xalaqaadka masaajidka waxa lagu baranjiray aqoon kala duwan (Naxwaha, Sarfiga, balaaqada, mandhiqa, tafsiirka, xadiiska, caqiidada iyo Fiqiga) wey dhici jirtay in qofku maaddo noqoto midda uu doorbido laakin inta kale waxbaa uga bilaawnaan jiray, hadda xalaqaadkii masaajidda waa sii dabar go'ayaan meela kooban ayey wali ka jiraan ayagana waxa laga baahiyaa duruus gaar ah oo sida tafsiirka, xadiiska iyo caqiidada, taasi waxa ay meesha ka saartay in la helo qof is difaaci karo haddii ay doodda ka baxdo xeyndaabka intii loo laqbeeyay, waayo naxwaha, balaaqada iyo mandhiqa waa furayaal saacido qofka inuusan ku ekaanin looxii loo meeriyay ee maskaxdiisa uu ka shaqeysiiyo, bixin karana jawaabo ka baxsan intii sheekha xalqada ka sheegay. Sidaasi si lamid ah amaba ka liidato ayey dugsiyada sare iyo jaamacaduhu soo saaraan dad ka arradan falsafadda dood la xariirto jiritaanka alle iyo waxa ay aaminsanyihiin.

Ilxaadka ama Alladiidka waa dood ku hubeysan muran cilmiyeed ku dhisan caqli, mandhiq iyo falsafad, waa dagaal u baahan isu dheelitirnaan dhanka hubka iyo taaktikada la adeegsado, isu dheelitirkaas markuu suurtagal noqdo ayaa guul laga soo hoyn karaa dagaalka ka dhanka ah ilxaadka ama ugu yaraan laga gaashaaman karaa.

Inta badan mulxidiintu ma jeclo qofka kula doodi karo mandhiq iyo falsafad, ma jeclo doodaha qofka yaqaan

sida fudud ee doodooda loosoo af meeri karo, waxa ay ugaarsadaan qaladaadka kuwa xagjirka ah, waxa eey ku doodaan in cidda islaamka sida dhabta ah u matasho ay yihiin Alqaacidda iyo Daacish, muslimiinta kale ay yihiin kuwa qurxinaayo islaamka daldalooladiisana qiil u raadinayo waa sida ay ku doodaan e, ujeedkoodana waa inay falalka gurracan ee kooxaasi ku dhaqmaan u daliilsadaan in Islaamku yahay diin dhiig daadis iyo gumaadka u taagan, diin aanan ogoleyn nolasha iyo horumarka aadanaha.

Kaalinta Qofka Muslimka ah

Waxaa lagama maarmaanka u ah aqoonyahanka muslimka ah si uu u noqdo qof ku qanacsan waxa uu aaminsanyahay misena uu difaacan karo waa in laga helo saddex tilmaamood oo kala ah :

Inuu aqoon ilaa heerkeeda macquul yahay u leeyahay culuumta diinta, uu yaqaanno shubahaadka eey beegsadaan mulxidiinta ee ku aadan islaamka iyo jawaababaha kala duwan ee culimada ka bixiyeen, waa inuu xog fiican ka haystaa meerayaasha doodaha mulxidiinta iyo jawaababaha ku habboon ee uu ka bixin karo.

Tan labaad waa in qofku xoojiyaa heerka ruuxaaniyaatka naftiisa oo uu noqdaa mid wardi badan, mar waliba joogteeyo inuu Allah danbi dhaaf weydiisto, waa inuu waxbadan ka akhriyaa ballan qaadka eebbe ee ku aaddan aakhira iyo qof waliba waxa ka horeeyo, waa inuu ogaadaa in macsi ama qalad mar iyo labo ka dhacay aysan jareynin xiriirka uu Alla laleeyahay, waa inuu ogaadaa in magaca ilaahay ee ah qafuur uu na tusinaayo in ay dabiici tahay in qofku gafo ama qaldamo qaladkaasi dhaafiddiisa uu alla qafuur u yahay.

Tilmaanta sadaxaad waa inuu ogaadaa markey diin iyo

xiriirka alle la joogo inaysan jirin cid uga wakiil ah ama beri ilaahay hortiis qareen uga noqoni, qof kastoo insaan ah si kastoo xiriirkiina u xoog badanyahay (waalid, qaraabo, saaxiib, sheekh iyo macallin) si kastoo kalsoonida aad u qabto u sareyso, haddana marna gar u yeelan karin in cid kale ku lumiso ama darteed aad diinta uga tagto. Quraanka inbadan ayuu ka hadlay arintaas, waxa uu noo sheegay in naf aan loo saarineyn naf kale qaladkeeda, waxaan aragnay aayadaha ka sheekeynayo in aakhiro aabahaa iyo hooyadaa iyo cid walba aad kala carareysaan, waxaan araganay aayadaha ka hadlaayo in xitaa sheydhaanku uu beri dhihi doono adeer waxbaan idiin sheegay waadna iska qaadateen haddana waxba idiinma galo, aayado kale oo kuwa la lumiyay iyo kuwii lumiyay wada doodayaan ayaa  isna jiro. Ugu danbeyn rasuulka SCW waxa laga wariyay "inaanan qof lagu adeeci Karin wax uusan alle ogoleyn". Marka ciddaa doonto aqoon ka kororso laakiin si indhala' ha ugu hoggaansamin.

Waa Maxay Insaaniyad?
Waxaan 7dii todobaad ee lasoo dhaafay wadnay qoraallo la xariiro Ilxaadka ama af Soomaali ku ah Alladiid, qormadeenna maanta waxa aan kaga hadleynaa mowduuc calaaqa xooggan la leh Ilxaadka ama Alla diidka waana waxa loo yaqaan "HUMANISM" ama Insaaniyad oo ah fikir dhowr qarni ka hor ka hana qaaday dalal kamid ah Yurub kuna dhisan in haybta, midabka iyo diimaha ay dadka kala qoqobaan, laakiin Insaannimadu ay tahay heybta qur ah ee isku hayn karto aadanaha, waana in dadka dunida ku nool isu baheystaan isu naxariisasho iyo is garab qabasho aanan loo eegeynin qofka midabkiisa, diintiisa iyo heybtiisa.

Mulxiddiinta Alladiidka ah waxa ay Insaaniyadda ka dhigtaan gabbaad ay ku qarinayaan marnaanta fikir ee la xariirto kaalinta diimaha ee ay dhabarka u jeediyeen, waxay abuurteen diin cusub oo la yiraahdo "HUMANISM", waxay sheegaan in diimaha dhan ku fashilmeen walaaleynta iyo iskaashiga aadanaha, Insaaniyadduna tahay waxa kali ah ee looga maarmi karo diimo dadka u kala qeybinaa laba saf oo isu cadaw ah.

Tiirarka Insaaniyadda

Fikirka Insaaniyadda waxa uu ku taaganyahay tiirar lix ah waana kuwan:

Rumeynta waxii hubanti maangal ah, iska fogeynta waxii dhabeecada ka baxsan.

Rumeynta jiritaanka koonka, insaankuna waa qeyb dhabeecada kamid ah, dhimashada wax kadanbeeyana maleh.

Fikirka qofka iyo garashadiisa waxay ku simanyihiin la falgalka dhabeecada iyo soo jireenka bulsho.

Caqligu waxa uu leeyahay ahmiyad iyo mudnaan sare, Insaankuna waxa uu si cilmiyeysan u adeegsadaa caqligiisa si uu u xalliyo mashaakilaadkiisa.

Anshaxa iyo mabaadi'da waxay u hoggaansamaan waxii soo kordho iyo filashada timaaddada ama mustaqbalka.

Markii si mug eh loo dhuuxo qodobadan lixda ah waxaa soo baxayo in Insaaniyaddu ay tahay Ilxaadkii oo loo magac badalay, nuxurkuna uu yahay in

aadanahu sameysto Ilaah iyo diin uu isaga mastaradda iyo maqaska uu u hayo, kuna jaan gooyo asaga aragtidiisa iyo rabitaannadiisa, taasoo xaalka ka dhigeyso in Ilaahii asaga wax abuuray noqdo mid la abuuray, macbuudkii uu noqdo mid asaga hoos tago kuwii caabudi lahaa.

Islaamka iyo Insaaniyadda

Mulxidiinta guud ahaan iyo gaar ahaan kuwooda ka gadooday Islaamka waxay ku doodaan in Islaamku uu yahay diin ku dhisan gacan ka hadal, faquuq iyo meel ka dhac xuquuqda aadanaha, waxa ay tusaale usoo qaataan arima ay kamid yihiin: Jihaadka iyo dhul furashadii Islaamka, Addoonsiga iyo Axkaamta xudduuda.

Waxaa wax dabiici ah in cid walboo xanaaqsan ay ku fashilanto ilaalinta caddaaladda, dhexdhaxaadnimada iyo ammaanada wax soo minguurinta. Dhalin badan oo ka gadooday Islaamka wali doodahooda waxaa ka muuqdo caro xoog leh iyo u oomanaan waxyeeleynta xushmadda diinta Islaamka, waxay si hubsiino iyo aqoon mug lehba ka aradan usoo gudbiyaan eedo ka dhan ah islaamka oo aysan waqti galinin.

Doodda ka dhanka ah insaaniyadda Islaamka waxay iska indho tirtaa laba xaqiiqa oo kala ah:

inkiraadda in Islaamku yahay diin insaaniyad: Islaamka ka risaala ahaan waxaa loo soo diray waa inuu aadanaha karaamadiisa iyo sharaftiisa sara u qaado, ujeeddooyinka guud ee shanta ah shareecada Islaamka waxa ay u taagantahay ilaalinta wax waliba uu aadana qiima u leh (Diinta, Taranka, maalka, Caqliga iyo Nafta) aayado badan oo Quraanka ah ayaa qeexay in waxa yaalo inta u dhexeyso cirka iyo dhulka (dhabeecada) loo sameeyay in aadanuhu ku noolaado.

Markey timaaddo la macaamilka dadka aan diin ahaan aan islaamka rumeysneyn Islaamku marna ma oggola in qof naftiisa ama maalkiisa lagu xadgubo sabab la xariirto inuusan Muslim aheyn, Ilaahay mar uu ka hadlaayay u baari iyo garsoor sameynta kuwa aan muslimka aheyn waxa uu ku yiri suuradda
60aad aayadda 8aad "Ilaahay idiin diidi maayo inaad u wanaag fashaan, garsoor caddaaladna kula dhaqantaan kuwa aan waxba idiin geysan (dagaal & barakicin) Ilaahayna waa uu jecelyahay kuwa caddaaladda ku dhaqmo" isla suuraddaasi aayadda xigta ee 9aad waxa uu ku leeyahay "Alle waxa uu idinka reebayaa inaad soo dhaweystaan kuwa idinkula dagaallamayo maxaad Islaam u tihiin, guryihiinnana idinka bara kiciyay oo waliba isu baheystay barakicintiina, ciddii soo dhaweysata ama olog la noqotaa waa daalimiin ciqaabta alla mudan". Dhanka naxariista islaamku waxa uu qabaa in beer nool walow xayawaanba ha ahaadee u wanaagsamayntiisa janno lagu mudanayo, halka Bisad ama mukulaal la xabisay lagu cadaab mutay.

Xaqiiqada labaad waa isu dheeli tirnaan la'aan ka jirto dhab ka hadalka Islaamka iyo diimaha kale, dhammaan Mulxidiinta kuwooda kasoo jeedo Islaamka iyo kuwa diimaha kale ka yimid waxa ay ka simanyihiin cadaawad ka dhan ah Islaamka oo aanan loo qabin Yuhuudda iyo Kirishtaanka, waxay ka simanyihiin waa buunbuuninta eedaha ka dhanka ah Islaamka xilli ay ka masuugayaan soo hadal qaadka diimaha kale, marar badan waxayba afhayeen u noqdaan difaaca diimaha kale, haddii ay si ka fog xanaaq cadaawad riixeyso isbarbardhig u sameyn lahaayeen waxay Islaamka ka sheegayaan iyo waxa diimaha kae ku saabsan

waxbadan ayey ka badali laheyd mawaaqiftooda.

Dagaal marka la yiraahdo ma ahan mid uu Islaamka bilaabay, mana ahan mid muslimiinta u gaar ah, furashada iyo qabsashada dhul cusub waa wax jiri jiray walina jiri dono, mar waliba waxaa kala gaddisan sababaha riixayo dhul ballaarsiga, waxaase mulxidiinta agtooda dabiici ka ah in muuqaal aan wanaagsaneyn laga bixiyay boqol muslimiin ah oo seefa iyo warma ku dagaallamayay, halka ay wax dabiici ah agtooda ka tahay 100 milyan oo dhimasha iyo dhaawac ah oo ay sababeen labadii dagaal ee adduunka. Muddo 1,500 oo sana ah cimriga Islaamka intii ku dhimatay colaado muslimiinta daraf ka yihiin ma gaareyso 2% khasaaraha labadaasi dagaal. Cilmiga lagu faanayo ee looga maarmayo diimaha waa kan soo hindisay labadii bam ee mareykanka ku dhuftay 1945 goobo ka mid ah dalka Japan (Hiroshima iyo Nagasaki) oo illaa hadda ay ku dhalanayaan ilma uusan abuurkoodu dabiici aheyn oo wali raadkii kiimikada ka muuqato.
Insaaniyaddu waa wax loo baahanyahay waase ineysan noqon gabbaad dano gurracan laga leeyahay, oo ujeedada maacaan ee muuqato mid dacar ah aysan ku hoos duugnen.

Islaamka iyo Cilmiga

waxaan wali bartanka kaga jirnaa qormooyinkeenii la xariiray Ilxaadka ama Alladiidka, qormadeenna maantana waxaan kusoo qaadaneynaa mid kamid ah doodaha Mulxidiinta ee Islaamka ka dhanka ah waana doodda la xariirta in diimaha iyo Cilmigu (Saynisku) is diidayaan, haddaba Annaga oo ka duuleyno Islaamku waxa uu ka yiri aqoonta iyo ahmiyadda ay leedahay in insaanku ogaado ama barto waxa uusan hore u aqoon iyo sida uu quraanka uga hadlay muhiimadda ay leedahay in koonka socod lagu maro si loo ogaado wax badan oo aqoon ah oo ka maqan insaanka.

Haddaba inta aanan u galin biya dhaca mawduuceena, waxaa muhiim ah inaan qeexno waxa uu yahay cilmiga.

Cilmigu luqad ahaan waa "in wax waliba xaqiiqadooda la ogaado" qeexid ahaanna waa "wadar ka kooban aragtiyo, dhacdooyin iyo hubantiyo".

Aayaddii ugu horeysay ee quraanka ayaa ka bilaabatay erayga ah "Akhri" oo waliba lagu leeyahay qof aanan waxba qorin waxna akhrin, kuna nool lamadagaanka jasiirad u egta carbeed. Waxa ay aheyd farriin xanbaarsan xog ah in diin daneyneyso cilmiga iyo aqoonta ay kusoo fool leedahay deegaankaas kuna baahi doonto dunida inteeda kale, Nabigii Ilaahay u doortay Risaaladaas waxa lagu yiri "waxaad akhrisaa, barataa magaca rabigaa ka abuuray Insaanka xinjir, akhri oo baro rabigaagii ah intii sharaf leh kan ugu sharaf badan, ee Qalinka wax ku baray, insaankana baray wax uusan aqoon".

Bal aynu eegno aayadaha kalee quraanka ee ka hadlayo wax barashada iyo aqoon kororsiga:

Suuratu Muxummed aayadda 19aad "Ogow ama baro in Ilaahay mooyee Ilaah kale uusan jirin"

Suuratu Israa, ayadda 36aad "ha ku mashquulin wax aadan aqoon u laheyn, maqalka, aragga iyo Qalbiga waxey qabtaan aakhira waxbaa la iska weydiinayaa".
Suuratu Faadhir aayadda 28aad "Ilaahay addoomadiisa waxaa cabsidiisa dareemo waa un kuwa aqoonta leh".
Suuratu Dhaahaa 114aad "waxaad dhahdaa Ilaahow Cilmi ii siyaadi".
Suuratu Cankabuut aayadda 20aad "waxaad dhahdaa socda oo dhulka mara waxaad u kuura gashaan sida uu ku bilaawday abuuranka koonka".
Suuratu (Z)umar aayadda 9aad "waxaad weydiisaa miyey simanyihiin kuwa aqoonta leh iyo kuwa aanan waxba ogeyn".
Nabiga SCW waxa uu axaadiis badan oo laga wariyay uu ku tilmaamay muhiimadda cilmiga iyo wanaagga qofka wax barta, sida soo socoto:
Ibnu Maajah xadiiska uu wariyay "raadinta barashada cilmiga waa ku waajib cid walboo muslim ah".
Tarmiidi iyo rag kale xaddiis ay wariyeen waxa uu ahaa "qofkii ku safro waddo uu cilmi ku doonayo ilaah baa u fududeeyo waddo uu jannada ku tago".
Sidoo kale waxaa jiro laba xaddiis oo lagu tilmaamo daciif xagga warinta laakin micna ahan xanbaarsan muhiimad fog oo cilmiga leeyahay waana "raadiya cilmiga laga bilaabo markaad dhalataan illaa iyo intaad ka dhimaneysaan" iyo " Cilmiga ka raadiya illaa shiinaha".
Aqoontu waa waddada uu qofku ku haleelo garashada Alle ee na abuuray iyo sida looga dheehan karo koonka tilmaamaha jiritaan Alle awood leh oo ka danbeeya abuuridda koonka iyo inta ku sugan.
Aqoontu waxa ay sare u qaadaa iimaanka qofka, waxay siyaadisaa alla ka cabsiga qofka sida aan kusoo marnay aayaddii 28aad ee suuratu Faadhir.

Aqoontu waxa ay dhistaa ummadaha, waxa ay dhaxalsiisaa ilbaxnimo dhan waliba ka dhameystiran. Islaamkuna asagoo tixgalinaa dhammaan sababaha aan kor kusoo sheegnay ayuu ku fogaaday bogaadinta ahmiyadda cilmiga.
Marka aynu ka hadleyno cilmi waxaa muhiim ah inaannu isla fahammno in cilmiga aynu ka hadleyno uusan aheyn oo Kaliyah mid ku saabsan culuumta shareecada Islaamka ee ka hadleyso xalaasha, xaaraanta, cibaadada iyo macaamalaadka ganacsiga iyo guurka ee bulshada dhexdeeda ah, waa sax oo waa qeyb cilmiga kamid ah muhiimna u ah Islaamnimada qofka iyo bulshadaba, waa mid fure u ah Islaamnimo sax ah oo lagu badbaadin karo adduun iyo aakhiraba, hase yeeshee sidaasi si lamid ah Islaamku waxa uu daneeyaa culuumta dhabiiciga ah ee kala duwan, waana midda aan uga hadli doonno qormadeenna soo socoto.

## Islaamka iyo cilmiga

Qeybtii hore waxaan ku xusnay si guud ahaan in Islaamku yahay diin dhiiri galisa cilmiga, annagoo soo bandhignay caddeymo quraanka iyo sunnaha ah, waxaan sidoo kale ku xusnay in cilmiga ama aqoonta uu Islaamku dhiiri galiyo aysan aheyn oo kaliyaha midda shareecadda ee la xariirto xalaasha iyo xaaraanta markey timaaddo hab dhaqanka iyo islafalgalka bulshada dhexdeeda, laakiin si lamid ah sidaasi waxa uu islaamku daneeyaa waxa loo yaqaan cilmiga dhabeecada ee adduunyada iyo inta ku nool ku saabsan.
qormadeenna maanta waxa aan kusoo bandhigi doonaa kaalinta muslimiinta ee la xariirto hanaqaadka

culuumta dhabiiciga ah iyo culimada Islaamka ee ugu caansan markey timaaddo hal abuurada culuumta dhabiiciga ah.
In badan oo kamid ah dadka wax ka sheego dib u dhaca ay muslimiinta ku jiraan xiligaan ee dhanka ilbaxnimada ah waxa ay xoogga saaraan oo kaliya xaaladda muuqata ee muslimiinta, iyaga oo iska indha tiro duruufaha guda iyo dibad ee xaaladdaani gaarsiiyay muslimiinta, iyo sidoo kale aanan xusin kaalintii ay culimada Islaamka ku lahaayeen horumarka dunida.
Markii ay muslimka ku jirtay bari samaadkii ay dunida calanka ilbaxnimada u sidday, waxaa si isdaba joog ah usoo If baxayay culimada Islaamka ee hal abuurka leh, kuwaasoo aqoonta ay dunida kusoo kordhiyeen aysan aheyn mid u gaar ah muslimiinta ee dhammaan aadanaha kala diimaha ah ee dunida ku nool ee ay ka wada faa'iideen, gaar ahaan reer Yurub oo luqadahooda u tarjumay dhammaan hal abuurradii culimada islaamku ay la yimaadeen.
Tusaale haddaan jaleecno dhanka taariikhda waxaa ina horyaalo liis dheer oo ah culima muslimiin ah oo aanan taariikhdooda iyo waxqabadkooduba aanan kusoo koobi karin maqaalkan, laakiin si koo kooban waxaan xusi karnaa culimada kala ah:
1. Abuu Cali Xasan ibn Alheytham
Waxa uu ku dhashay magaalada Basra ee dalka Ciraaq 96  taariikhda miilaadiga, waxa uuna ku geeriyooday magaalada Qaahira ee caasimadda Masar 1040, waxa uu qoray in kabadan 16 kitaab oo ku saabsaan xisaabaadka, Injineeriyada, Caafimaadka iyo Cilmiga xidigiska.
2. Abuu Alxasan Cali "Ibn Nafiis"
Waxa uu ku dhashay magaalada Dimishiq ee

Caasimadda dalka Siiriya 1,213 taariikhda miilaadiga, waxa uuna ku geeriyooday magaalada Qaahira ee caasimadda dalka Masar1,288, waxa uu ahaa Caalim muslim ah, ku xeel dheer arimaha caafimaadka, waa caalimkii ugu horeeyay ee adduunka ee ogaada jiritaanka "habka wareegga dhiigga" sidoo kalena soo bandhiga xubnaha jirka ee kala duwan iyo mid waliba shaqada ay qabato.

3. Jaabir Bin Xayaan

Waxa uu ku dhashay magaalada Toos ee dalka Iiraan sanadkii 721 ee taariikhda miilaadiga, waxa uuna ku geeriyooday magaalada Kuufa ee dalka Ciraaq 813, waxa uu ahaa caalim muslim ah oo ku xeel dheeraa culuumta Kiimikada, Daawooyinka iyo Cilmiga xidigiska, waxa uu qoray in kabadan 18 kitaab oo la xariiro hal abuuro aan isaga looga horeyn oo la xariiro kiimikada, macdanta iyo xidigiska.

4. Maxamed Ibn Muusa Alkhawarazmy

Waxa uu ku dhashay magaalada Khwarasm ee dalka Uzbekistan 781 taariikhda miilaadiga, waxa uuna ku geeriyooday magaalada Baqdaad ee caasimadda dalka Ciraaq 847, waa caalim muslim ah oo xiligii boqortooyadii Cabbaasiyiinta masuul ka ahaa Maktabaddii la dhihi jiray "Hoyga Xikmadda" oo uu aasaasay amiirkii la oran jiray Alma'muun, looguna tala galay in ay noqoto Maktabad lagu aruuriyo buugaagta laga soo tarjumo luqadda Giriigga, Alkhawarazmy waxa uu qoray buugaag badan oo ku saabsan xisaabta aljabrada oo loo tarjumay luqadaha Ingiriiska iyo Talyaaniga, sidoo kale waxa uu sameeyay markii ugu horeysay Khariidadda aduunka asagoo ay la shaqeynayaan in ka badan 200 howl wadeenna ah.

5. Abuu Cali Al-xuseyn "Ibnu Siinaa"

Waxa uu ku dhashay magaalada Afshona ee dalka

Uzbekistan 980 taariikhda miilaadiga, waxa uuna ku geeriyooday magaalada Hamadaan ee dalka Iiraan 1,037, waa caalim muslim ah oo culimada muslimiinta u yaqaanaan “Sheekhu Ra”iis” oo ay ula jeedaan Culimada kan ugu sareeyo, halka kuwa Reer Galbeedka u yaqaanaan “Amiirkii Culimada Caafimaadka” waxa uu ahaa dhakhtar ku xeel dheer culuumta caafimaadka, waxa uu qoray in ka badan 20 kitaab oo isugu jiro caafimaad, xidigis, macaadinta iyo Xisaabta.

6. Abuu Nasar Maxamed Alfaaraabi

Waxa uu ku dhashay magaalada Farab ee dalka Kazakhistaan 872 taariikhda miilaadiga, waxa uuna ku geeriyooday magaalada Dimishiq ee caasimadda dalka Siiriya 950, waa caalim muslim ah oo ku xeel dheeraa Caafimaadka, sidoo kale waxa uu caan ku ahaa Falsafadda waxa uu Tarjumi jiray kutubtii uu qoray Aristotle illaa Faaraabi loogu magac daray “macallinkii labaad” yacni Aristotle ayaa ah macallinkii koowaad, asagana waa kan ku xiga.

7. Abuu Al-Qaasim Khalaf Bin Cabbaas Alzahraawi

Waxa uu ku dhashay magaalada Cordoba ee dalka Spain 936 taariikhda miilaadiga, xiligii ay muslimiinta ka talinayeen goballo kamid ah dalkaasi, waxa uuna ku geeriyooday isla magaalada Cordoba sandkii 1,013, waa caalim muslim ah oo ku xeel dheeraa caafimaadka gaar ahaan qaliinka, suuxinta iyo tolliinka, waxa uu dhaxal ahaan uga tagay mowsuuca (encyclopedia ) ka kooban 30 jus.

8. Abuu Alxasan Cali Almascuudi

Waxa uu ku dhashay magaalada Basra ee dalka Ciraaq 896 taariikhda miilaadiga, waxa uuna ku geeriyooday magaalada Qaahira ee caasimadda Masar 956, waa caalim muslim ah dhul mareen ah, wax badan ka qoaray (anthropology) deegaanada iyo dadyowgii uu la

kulmay intii uu dhulmarista ku jiray, sidoo kale waa caalimkii ugu horeyay ee dunida ee daaha ka rogo waxa loo yaqaan  Hiddo-wade “Genetic Drift” .
9. Abuu Reyxaan Maxamed Axmed albeyruuni
Waxa uu ku dhashay magaalada Byron ee dalka Uzbekistan 973 taariikhda miilaadiga, waxa uuna ku geeriyooday magaalada Kabul ee Caasimadda dalka Afghanistan 1,050, waa caalim Muslim ah dhul mareen ah, ku xeeldheeraa Falsafadda, Cilmiga Geologyga, daawooyinka, xisaabta, Juquraafiga, Xidigiska iyo Tarjumidda kutubta luqadaha qalaad, waxa uu qoray in ku dhaw 10 kitaab oo ah culuum kala duwan.
10. Abuu Yaxyaa Sakiriye Alqaswini
Waxa uu ku dhashay magaalada Qazvin ee dalka Iiraan 1,203  taariikhda miilaadiga, waxa uuna ku geeriyooday magaalada Baqdaad ee caasimadda Ciraaq 1,283, waa caalim muslim ah oo ku xeel dheer culuumta Taariikhda, Juquraafiga, Xidigiska, Dhirta iyo Xayawaanka.
Intaasi waa ay ka badan yihiin Culimada muslimiinta ee raadadka muuqda kaga tagay horumarka aqooneed ee dunida aan ku noolnahay, waxa ayna marag iyo caddeyn u yihiin in kasokow ahmiyadda uu Islaamku siiyay aqoonta iyo dadkeedaba in haddana Muslimiinta markasta oo ay helaan duruufta ku habboon ay si cad uga dhexmuuqanayaan horumarka aqoonta iyo hoggaaminta hal abuurka, ayadoo aan la socono in usbuucan madaxweynaha mareykanka D. Trump uu u magacaabay la taliyahiisa xagga caafimaadka iyo xakameynta Covid 19 dhakhtar muslim ah oo la yiraahdo Dr. Munsif Maxamed Alsilaawi.

ISLAAMKA IYO CILMIGA

Islaamka iyo Cilmiga (3)
Labadii qormo ee u danbeeyay waxaan kaga hadalnay Islaamka iyo cilmiga, annagoo ku hormarnay sida quraanka iyo sunnaha uga hadleen cilmiga iyo muhiimadda ay leedahay raadintiisa, sida dadka cilmiga bartay uga sharaf badanyihiin kuwa aanan waxba baramin. Qeybtii xigtayna waxaan kaga hadalnay qeybtii libaax ee ay muslimiintu ku lahaayeen hal abuurada cilmiyeed ee dunida waxbadan kusoo kordhiyay, annagoo si kooban usoo qaadannay xogta toban kamid ah culimadii hore ee Muslimiinta ee dunida kusoo biiriyay hal-abuuro cilmiyeed ee waxtar badan u yeeshay aadanaha dunida ku dhaqan.
Qeybtanne waxaan kaga hadleynaa xaqiiqada doodda ah in diimaha, gaar ahaan Islaamka iyo hubantiyada aqooneed aysan is qaadan Karin, taasoo ay marmarsiiyo ka dhigtaan Alla diidka diinta isaga huleelay.
Hubantiyada jiro waxaa kamid ah in cid kastaahi waxii ay garashadeeda ka gaabiso aysan u arkin wax cusub

oo u baahan hubin iyo u kuur-galid lagaga sal gaarayo dhabnimadeeda iyo waxa ay xanbaarsantahay, taa badalkeedana kala dul dhacdo weerar iyo inkiraad aanan loo meel dayin, waana halka ay salka ku hayso mushkiladda is maan-dhaafka aragtiyada diimeed iyo kuwa Sayniska. Culimadii kirishtaanka ee qarniyadii hore waxay aaminsanaaayeen in aqoontooda diineed ay saldhig iyo halbeeg u tahay aqoon kastoo dunida taallo, wax alla waxii cusub ee dhaafsan heerkooda aqooneed ama haleelid waxay ku shaabadeeyeen diin ka bax iyo hawl sheydaan!.
Galileo Galilei oo ahaa caalim Talyaani ah, oo noolaa Intii u dhexeysay (1564 illaa 1642dii) kaasoo dunida kusoo biiriyay daah ka qaadis iyo hal abuurro aqooneed oo cusub, sanadkii 1609kii ayuu baaritaan dheer kaddib waxa uu daaha ka rogay in Cadceeddu tahay xudunta kawnka aan ku noolnahay, waxa soo harayna oo dhulka aan ku noolnahay uu kamid yahayna ay yihiin meerayaal Cadceedda ku meereysta, taasi oo noqotay wax cusub oo hal kama jiraan ka dhigtay aragtidii hore ee adduunka laga aaminsanaa ee ahayd in Dhulku yahay xudunta kawnka, qorraxduna kasoo baxdo Bari una dhacdo Galbeed.
Culimadii kirishtaanka ee xilligaas ee aaminsanaa in iyagu yihiin furaha aqoonta iyo isha ay ka timaaddo arintaasi waa u cuntami waysay, Galilei oo ahaa caalimkii la yimid aragtiyada cusub waxa lasaaray Maxkamad, waxaana lagu xukumay inuu yahay Murtad la yimid wax diinta looga baxo, wixii uu qorayna ay mudanyihiin in la gubo maadaama ay yihiin hawl sheydaan, asagana uu xabsi guri ku qaato inta cimrigiisa ka dhiman.
Waa hal tusaale oo kamid ah dhacdooyinkii kaniisadda ay ku caburin jirtay kacdoonnada aqooneed ee Yurub

kagasoo baxday qarniyadii dhexe oo ah qarniyo ay nolol mugdi iyo dib u dhac ay ku nooleyd qaaradda Yurub, waxaa xusid mudan in culimada diinta Kirishtaanka ee xilligaas aysan ka duuleynin caddeymo diimeed oo xoojinayo diidmadooda horumarka aqooneed ee xilligaas, laakiin sababta rasmiga ah ay aheyd marka hore waxaan oo aqoon ahaan ku cusub oo aysan horay uga barannin Biblekii ay haysteen, iyo tan labaad oo ah iyagoo u baqayay inay waayaan danaha iyo qadarinta ay ku helaan maamuuska diinta iyo culimanimada ay ka helayeen bulshada iyo hoggaanka siyaasadeed ee talada boqortooyada hayay, iyadoo caadadu aheyd in boqorradu soo dhaweystaan dadka aqoonta leh ama ugu yaraan hal abuurka leh, marka hal abuurradii cusbaa raggii hor kacayay waxay si aan ku tala gal aheyn halis u galiyeen danahii iyo maamuuskii culimada kaniisadda.
Markey timaaddo tartan salka ku hayo dano iyo maamuus darajo waa wax dunida ka dhaco una baahan in loola fal-galo sida uu yahay ee ma ahan in loo saaro hab aysan u jirin ama ooga faa'iideysto dano kaloo iyagana gurracan, waa hab dhaqan aanan ku xirneyn bulsho gaar ah ama diin gaar ah.
Markii aan u nimaanno Islaamka iyo hal abuurka cilmiyeed ee la xiriiro, waxaan soo marnay sida uu Quraanka iyo Sunnahaba u dhiiri galiyaan cilmiga iyo culimada, iyo waliba in dadka la faray inay caqligooda hawl galiyaan, oo u dhabba galaan koonka iyo waxa ku dhex sugan, si ay u arkaan kalinnimada Ilaahay iyo inuu yahay abuuraha koonka, sidaas oo ay tahayna waxa muslimiinta qudhooda ka dhex dillaacay dagaal u dhaxeeyo culimada shareecada iyo kuwii culuumta dhabiiciga, illaa ay gaartay in qaar badan oo kamid ah culimadii Islaamka ee aan qeybtii labaad kaga soo

hadalnay diinta looga saaray sabab la xiriirto aragtiyo cilmiyeed ay lahaayeen, kuwaasoo u cuntami waayay qaar kamid ah culimadii fiq-higa.
Sheekhii Siiriyaanka ahaa ee Sh. Maxamed Almajduub oo noolaa (1907-1999) waxa uu ku sheegay kitaabkiisa “Islaamka iyo Mushkilaadka Jiilka cusub” in muftigii hore ee Sacuudiga Sheekh C/casiis Bin Baas uu diiday fikradda ah in dhulku uusan fidsaneyn ee uu yahay mid u qaabeysan sida kubadda ama Banooniga, kaddib ayaan la fariistay una sharxay in arintan ay tahay mid cilmi ahaan la xaqiijiyay, aananna ka hor imaaneyn sida Quraanka uga hadlay dhulka, niqaash dheer kaddibna uu ku qancay warkeygii”.
Marka sida aan horay kusoo xusnay arintu ma ahan mid la xiriirta NASKA (aayad ama xadiis) oo si cad u diidayo cilmiga cusub, ee waa laba arimood ee aan sare ku soo sheegnay halka ay sartu ka quruntay, waa wax kastoo cusub oo ay adagtahay in horay laga aqbalo, iyo ayadoo la ilaashanaayo dano gaar ah in geeska loo daruuro wax kastoo cusub iyo cidda wadato, waxaa xusid mudan in diimaha lagu eedeynayo ineysan aqbali karin cilmiga cusub, in iyagana markii ay cusbaayeen si lamid ah geeska loogu daruuray, lalana dagaallamay ciddii calanka u siday.
Waxaa sidoo kale xusid mudan in halkii shalay culimada diinta ay isku dayayeen la kali noqoshada hanashada isha aqoonta, wax kastoo cusubna la dagaalamayeen, ayaa waxaa kaalintii qaatay culimada culuumta dhabiiciga ah in badan oo kamid ah oo ku doodayo in cilmiga dhabiiciga ah yahay isha xaqiiqada, wixii kasoo haray ay yihiin huuhaa iyo wax umadaha lagu marin habaabiyo!.
“Mid walba oo kamid ah aragtida sharciyeed iyo tan caqliyeed waxay yeelan karaan aragtiyo kala madax

bannaan, laakiin iskuma khilaafaan wax sugan, hubanti cilmiyeed ee saxan kama hortimaaddo qaacida diini ah oo sugan, wixii malo ku dhisanna waxaa la waafajinaa wixii sugan, haddii ay labadaba mala ku dhisanyihiin waxaa mudnaanta leh malaha diineed".
Asalka 19aad ee 20ka Asal ee Xasan Albannaa

Qormooyinkeenii taxana ahaa ee sadaxdii usbuuc ee u danbeysay waxaan kaga hadleynay Islaamka iyo Cilmiga, qeybtan oo ah qormadii 4aad ee igu dambeysay taxanahan, waxaan kusoo qaadaneynaa "Anshaxa iyo cilmiga" oo ah mid kamid ah meelaha ay Islaamka iyo cilmigu ku kulmaan, waxa aanu ku qaadaa dhigi doonaa qormadan jawaabaha weydiimahan sadaxda ah:
Waa maxay Anshax? waa maxay muhiimadda Anshaxu u leeyahay Cilmiga? maxaa halbeeg u ah anshaxa kiisa habboon iyo kan aanan habbooneyn?
Waa Maxay Anshax?
Anshax ama Akhlaaq waa hab dhaqanka bulshada sida guud u aragto inuu yahay mid waxa wanaagsan horseeda, waxa xunna baajiyo, waana wax aadanahu kaga duwanyahay noolaha intiisa kale, dhammaan Ummadaha dunida ku dhaqan waxa ay nuxur ahaan ka mideysanyihiin waxaa anshaxa.
Islaamku ka diin ahaan, waxa uu xoogga saaray muujinta anshaxa iyo saameyntiisa bulshada, Quraanka oo ah isha koowaad ee aqoonta Islaamka waxa Nabi Muxamed lagu tilmaamay inuu yahay mid ku dhaqma Anshaxa kiisa ugu sarreey (68:4).
Khadiija Bint Khuweylid, oo aheyd xaaskii Nabiga NNKH ee xiligii uu waxyigii ugu horreeyay lagu soo dejiyay isla markaana uu dareemayay cabsi badan, ayaa waxa ay ku tiri si niyaddiisa u dejiso in aysan jirin sabab

uu u walaaco, waayo waxaad tahay ayey tiri " qof qaraabada xiriiriya, runta ku hadla, martida soora, kii dhibban garab qabta, xakhana aan ka hiilinin".
Gaaladii reer Qureysh markii uu Islaamka soo degay ee la soo ban dhigay waxyaalaha habboon iyo kuwa aan habbooneyn waxa ay ku jawaabeen waxan waa dhaqamdii dadkii hore (26:13).
Abuu Xaamud Al-Gazaali waxa uu anshaxa ku qeexay "inuu yahay dabciga qofka naftiisa ku raadeysan ee uu kaga falceliyo waxa soo wajaho si dhakhsa ah oo aan laheyn ka fiirsasho iyo u kaadin" Ixyaa culuumu diin (3:47).
Markaan u nimaano reer Galbeedka iyo qeexiddooda Anshaxa Manuel Velasquez iyo saaxiibadiis waxa maqaal ay baahisay xarunta Markkula Center for Applied Ethicks ay ku qeexeen Anshaxa inuu yahay "halbeegyada waxa sax ama qalad ah, waa waxa ay tahay in aadanuhu ku dhaqmaan markii la joogo waajibaadka, xuquuqda iyo danta guud, waa waxa qofka ka hor istaago inuu ku xad gudbo qof kale, waa tilmaamaha wanaagsan ee qofku yeesho sida; runta, naxariista iyo daacadnimada".
Muhiimadda Anshaxu u leeyahay Cilmiga
Cilmigu waa seef laba af leh, sida culimada daaha uga rogeen daawooyinka badbaadiyo nafta ayey si lamid ah u soo kashifeen sunta ilbiriqsi ku sababto dhimashada, daawada badbaadisa nafta waxa ay leedahay kuuro loogu tala galay bukaanka oo haddii xadkeeda la dhaafiyo sababi karta geeri degdeg ah, ama dhibaato uu la noolaado bukaanku muddo badan, hadana arrimahan oo dhan waxa hagayo waa anshaxa oo damiirka qofka u diidayo in uu aqoontiisa u adeegsado wax lid ku ah badbaadada qofka.
Anshaxu waa mid xiriir xoggan la leh cilmiga,

xiriirkaasi oo laba jeerba aanan Anshaxa laga maarmi Karin, waa marka koowaadee marka ay socoto cilmi-barista lagu raadinayo in hubinti lagu gaaro, waxaa muhiim ah in dadaalka cilmi-baaristu uu noqdo mid dareen aadane xanbaarsan, cilmi baaruhu ahaado mid ku dhaqma Runta, Hufanaanta iyo Amaanada. Markii cilmi-baaruhu gaaro natiijooyin wax ku ool ahna anshaxu waxa uu suurta galiyaa in miraha cilmi-baaristu ahaado mid aanan waxyeela u geysan aadanaha, xayawaanka, dhirta iyo guud ahaan deegaanka,

Sanadkii 2003 ayaa waxa soo baxay film mala awaal cilmiyeed oo la yiraahdo "The HULK" kaasoo uu soo saaray Ang Lee, Jilayaalna ka ahayeen Eric Bana iyo Jenifer Connelly, qisada filmkuna waxa ay ku saabsaneyd mid kamid ah khubara cilmi baaris waday ay si aan ku talagal aheyn u haleelay shucaac kiimiko oo sababay in jirkiisa ku dhac isbadal hoormoon oo markastuu uu xanaaqo noqonayo bahal cagaaran, aad u weyn una xoog badan ayna adkaaneyso in loo babac dhigo, kaasoo diyaaradaha dagaalka iyo kaariyaasha ciidanka dharbaaxo kaga hortagaya.

Dhacdadaasi waa tusaale mala awaal ah, waase wax suurta gal ah in qofkii damiirkiisa dhinto uu sababi karo dhibaato intaasi ka badan, marka Anshaxu waa dabarka cilmiga ka dhigo mid ka reebban inuu u shaqeyo si hareer marsan badbaadada aadanaha iyo baraarahiisa, xitaa Bambooyinkii mareykanka ku qaraacay magaalooyinka Hiroshima iyo Nagasaki ee dhimashada iyo baaba'a badan sababay walina saameynteeda laga dheehan karo ma aheyn kuwa loo sameyay asalkoodi hore in dagaal aadanaha ka dhan ah loo adeegsado ee waxa uu ahaa mid loogu tala galayin lagu jabiyo buuraha, laakiin markii weerarkii

diyaaradaha Japan uu soo gaaray dekedda Pearl Harbor ee gobalka Hawaii ayuu Mareykanku adeegsaday Bamkii nukliyerka ee loogu tala galay in buuraha lagu jeexo.
Maanta waxa mareykanka ka socdo dibadbaxyo ay dhigayaan dadweyne aan wadaagin, isir, midab iyo diin midna laakiin isku aragti ka ah in falkii arxan darada ahaa ee loo geystay muwaadin madow ah oo ku dhintay xadgudub uu u geystay askari caddaan ah oo booliska mareykanka ka tirsan, waa caddeyn kala oo ah in awoodda loosiiyay booliisku in ay sugaan nabadda iyo kala danbeynta aysan ka dhigneyn in ay nafta aadanaha iyo karaamadiisa ay banneystaan.
Halbeegga Anshaxa suuban
Culimada wax ka qorta Falsafadda Anshaxa waxa ay badankoodu isku raaceen in ummadaha dunida ku dhaqan ee kala duwan ay yeeshaan Anshaxa guud oo ku saleysan, Dabciga nafta Aadana, dhaqanka qoyska iyo bulshada, iyo ugu danbeyn diimaha ay kala aaminsanyihiin.
Socrates, oo ah aabbaha Falsafad yaqaanada waxa uu qabaa in "Nafta Aadanaha dhabiiciyan u hoggaansantahay sameynta waxii ay u aragto inuu yahay wax wanaagsan. Sheydhaannimada iyo dhaqamada aan habbooneyna ay salka ku hayaan aqoon darri. Dadka geysta faldanbeydkana haddii ay ahaan lahaayeen kuwa si dhab ah u garanayo waxa ka dhalan karo falal ay geysanayaan, ma aysan ahaadeen kuwa geysto ama ay la wanaagsanaato geysashadeeda. cid walba oo garaneysa waxa sax ah waa ay ku dhaqaaqdaa sameyntiisa. Qofka caaqilka ah waa uu yaqaanaa waxa habboon, waana uu sameyaa waxaa wanaagsan, sidaas ayuuna ku ahaadaa mid farxad ku nool".

Dr. George L. Head oo ah aqoonyahan ka tirsan American Institute waxna ka qora arrimaha Anshaxa (Ethics) waxa uu leeyahay "dhammaan diimaha kala duwan dadka waxa ay baraan waxa uu yahay Anshaxa habboon, daacadnimada, is xushmeynta dhexdooda, ka fogaanta naf jecleysiga, dadka ku dhaqma diinta waxa lagu yaqaanaa iney u dhaqamaan hab inteena badan aan u arki laheyn inuu yahay anshaxa habboon, diintooda ayaa ku hagta anshaxa qofeed habboon si cad oo isku jaan go'an, halka kuwa aan diinta ku xirneyn ay u dhaqmaan qab daneysi ah anshax ahaanna aan sax aheyn".

Dr. Axmed Reysuuni oo ah madaxa midowga Culimada Muslimiinta waxa uu leeyahay Anshaxa (akhlaaqda) waxa ay ka timaadaa sadax meelood:

Dareen guud (common sense)

sida aan horay usoo marnay ee Socrates ayuu la qabaa in nafta aadanaha dhabiiciyan u hoggaansantahay sameynta waxii ay u aragto inuu yahay wax wanaagsan. Waxa uu leeyahay Aadanuhu waa ay ku abuurantahay jeclaanta sameynta anshaxa habboon iyo ka maagidda waxa aanan habbooneyn, si kastoo shakhsiyaadka ama bulshooyinka ugu kala duwanaadaan qiimeynta habdhaqanada qaar, hadana waxaa jira wax badan oo ay ka mideysanyihiin inuu yahay Anshaxa  habboon ee mudan in la joogteyo, waxaana ka mid ah "Runta, Amaanada, Oofinta balamaha, ixsaan falka, kibir la'aanta, Caddaaladda, sidaasi si lamid ahna waxaa jira waxyaabo aan Anshaxa ku habbooneyn oo la isla oggolyahay naftuna ka biyo diido sida Garadarada, Isla weyniga, Beenta, Isdaba maryada, Naf jeceleysiga, Dhagarta.

Diinta

waxaa la wada ogyahay in Anshaxa iyo tusaaleynta

Anshaxa kiisa habboon uu yahay halbowlaha diimaha kala duwan, xilli walba iyo ummad walboo nool Anshaxu waxa uu ku lamaanan yahay Diinta iyo ku dhaqankeeda, Nabiyada iyo intii raacdayna waxa ay ahaayeen kuwa calanka u sida Anshaxa habbon iyo baahintiisa.

Dhaqanka bulshada

Bulsha walba oo meel ku nool waa ay yeelataa xeerar iyo anshaxyo ay tahay in lagu dhaqmo si loo ilaaliyo jiritaanka bulshada iyo waxii ay wanaag u aragto, anshaxyada noocaas ah inta badan waa kuwa salka ku hayo labada qodob ee hore.

DHAMAAD